



**WAR-MURTIYEEDKA**  
SHIR-SANNADEEDKA 5AAD EE  
**XEER ILAALIYAYAASHA**  
**SOOMAALIYEED**

“GAARSIINTA ADEEG XEER  
ILAALINEED OO TAYAYSAN”

**2023**

## **HORDHAC**

Shir-sannadeedka 5<sup>aad</sup> ee Xeer Ilaaliyeyaasha Soomaaliyeed oo sannadkan hal-ku-haggiisu yahay: "Gaarsiinta Adeeg Xeer Ilaalineed oo Tayasan" ayaa lagu qabtay Hotel DECALE ee magaalada Muqdisho Soomaaliya. Shirkaas wuxuu socday muddo 2 maalmood ah 20-21 ka Feb 2023.

Shirka waxaa ka soo qeyb galay madax ka kala socotay Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka iyo Xafiisyada Xeer IIaalineed ee Dawlaha Xubnaha ka ah Federaalka, Guddiyada Garsoorka Arrimaha Diinta iyo Cadaaladda ee labada Aqal Baarlamaanka JFS, Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed, Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha, Bangiga Dhexe, Hay'adda Warbixinada Maaliyadda, Wasaarada Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, Wasaaradda Arrimaha Gudaha Federaalka iyo Dib u Heshiisiinta Maxkamadda Sare, Maxkamadda Racfaanka iyo Gobolka Benaadir, Ururka Qareenada Soomaaliyeed, Culumada Soomaaliyeed, Ururada Bulshada Rayidka ah, Hay'addaha " IDLO, EUCAP, UNSOM iyo UNODC" iyo Marti Sharaf kale.

Shirka waxaa furay Ra'iisul Wasaaraha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

## **BAAQA SHIRKA**

1. Ka qeyb galayaasha Shirku waxay mahad u celinayaan qabanqaabiyyaasha shirka iyo hay'adaha ka qeyb qaatay taaba galidda shirkaan oo socday mudo laba maalmood ah.
2. Shirku wuxuu bogaadinayaa guulaha ay Ciidamada Qaranka iyo Shacabka oo iskaashanaya ay ka gareen xoraynta dalka laga xoraynayo khawaarijta.
3. Waxaa la xusay sida ay lagama maarnaanka u tahay in adeegga xeer ilaalinta iyo cadaaladda la gaarsiiyo goobaha la xoreeyay; waxaana Wasaaradda Cadaaladda iyo hay'adaha Garsoorku ay ku boorriyeen in si dagdag ah loo gaarsiiyo adeegaa.

4. Shirku wuxuu bogaadinayaa dadaalada la xiriirada la-dagaalanka lacag-dhaqidda iyo maalgelinta argigixsada, wuxuuna boorrinyaan in la sii xoojiyo hawlahaas.
5. Shirku wuxuu bogaadinayaa hagista iyo kormeerka joogtada iyo xafiisyada hagista ee lagu furay XIGQ iyo CID. Waxaa la xusay in hawlahaan oo laga gaaray horumar hordhac ah, la sii joogteeyo lana gaarsiiyo nidaamkaa DXF.
6. Wuxuu kaloo shirku bogaadinayaa wada shaqeeynta joogtada ah iyo xiriirka adag ee ka dhexeeyya xafiiska xeer-ilaaliyaha guud ee qaranka iyo hay'adaha Baarista dalka, wuxuuna boorinayaa in la joogteeyo kormeerka iyo wada shaqeeynta u dhexeysa boliiska iyo xeer-ilaalinta.
7. Shirku wuxuu adkaynayaa baahida loo qabo in la tayeeyo hay'adahabaarista oo hawbawlo u ah helidda cadaaladda, wuxuuna soo jeedinayaa in la dib-loo-habeeyo sharchiyeedada, madaxbanaanineeda iyo tayadeedaba.
8. Shirku wuxuu bogaadinayaa dadaalada dib loogu qiimaynayo istiraatijadda qorshaha qaran sannadaha soo socda. Qorsha kasta oo la sameeyaana waa inuu ka turjumaa higsiga lana jaanqaado himilooyinka lagu taamayo.
9. Shirku wuxuu bogaadinayaa dadaalka XIGQ ee lagu casriyaynayo nidaamka maamulka galalka (case management system) oo lagama maarmaan u ah helidda cadaalad hufan, la heli karo oo dhexdhixaad ah.
10. Shirku wuxuu hoosta ka xarriiqay dhibaatooyinka maandooriyaha iyo tacadiga jinsiga ay ku hayaan bulshada Soomaaliyeed. Wuxuuna soo jeedinayaa in hortabinta sannadkan la siiyo la dagaalanka musuqa iyo maadooriyaha, iyo jaraa'imta anshaxa ee baraha bulshada.

11. Shirku waxa uu gartay ahmiyadda uu leeyahay Xafiiska Diiwaanka Dembiyada wuxuuna boorinayaan howlaha socda ee la xiriira howlgelinta xafiiskaasi. Shirku wuxuu markaa Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka u soo jeediyay inuu hubsada fulinteeda, lana gaarsiiyo DXF, laguna billaabo uruurita go'aanada maxkamadaha.
12. Shirku waxa uu hoosta ka xariiqay muhiimadda uu Machadka Tababarka garsoorku u leeyahay midaynta manhajka, tayeynta iyo, kor u qaadista xirfadda xeer-ilaaliyeyaasha. Waxuu kaloo boqaadinayaan howlaha la xiriira daadejinta adeegga machadka ee Dowladaha xubnaha ka ah dowladda federaalka soomaaliya.
13. Shirku wuxuu bogaadinayaan kobaca ka muuqda iyo talaaboo yinka lagu horumarinayo wada-shaqaynta XIGQ, Xafiisyada Xeer Ilaalineed ee DXF, hay'adaha dawladda iyo hay'adaha horumarinta.
14. Shirku wuxuu soo dhaweynayaan dadaalada midaynta iyo ka go'aan gaarista xaashida eedda.
15. Shirku wuxuu bogaadinayaan boorinayaana in kor loo qaado wacyigalin busho oo la xiriirta saamaynta taban ee uu bulshada ku leeyahay danbiyada iyo in tilaabo sharci waafaqsan laga qaadi karo cidda ku xadgudubta tacadiyada iyo fal-danbiyeedyada.
16. Gunnaanad, Shirku wuxuu aqoonsaday doorka Xafiiska Xeerilaalinta heer federal iyo heer Dowlad goboleed ku leeyihiiin dowlad dhiska soomaaliyeed ayna lagama maarmaan tahay in la helo xeerilaaliyeyaal ku qalabeysan aqoon, daacadnimo, karti iyo hufnaan.

**Dhamaad.**

**Allaa Mahad leh**

**Talaado, 21ka Febraayo, 2023**